



School District 622

NORTH ST. PAUL | MAPLEWOOD | OAKDALE

Ready for tomorrow

Qorshaha Muhiimadda leh ee Degmo Dugsiyeedka 622 Diseembar, 2016

Qiimaha Laf-dhabarka

Waxaan rumeysan nahay in:

- Jaaliyad xoogan ay tahay mid loo dhan yahay oo dadyowga kala duwan qiimaysa.
- Is-aaminaadda iyo furnaanshaha waxay assaasi u tahay xiriir caafimaadeysan oo waara.
- Waxbarasho iyo adeeg joogto ah in loo fidiyo dadka kale waxay laga maarmaan u tahay horumarka shaqsiga iyo jaaliyadda.
- Shaqsiyaadka waxay wax ku bartaan oo ay ku liibaanaan marka loo fidiyo bay'ad ama deegaan ammaan ah, daryeesha, oo taageero bixisa.
- Shaqsi kasta wuxuu leeyahay ixtimaal cajiib ah iyo qiimayn dhaxal-gal oo siman.
- Qofka wax wayn laga fisho iyadoo taageero ku haboon la siiyo waxay dhalisaa kobac.
- Wadashaqayn uu dhuxmaro iskuulka, qoyska, iyo jaaliyadda wuxuu wanaajisaa oo uu taageeraa waxbarashada.

Himilada Hawlgalkeenu waa

Maalin kasta waxaa naga go'an in aan hormarinno oo aan xoojinno bartayaasha mustaqbalka oo jaaliyado kala duwan ku liibaanna.

Natiijooyinka Bayaanka:

1. Waxbarte kasta wuxuu isticmaali doonaa fahamkiisa awood hal-abuur, fikir qoto-dheer, iyo fahamkiisa dhaqannada is-dhexgalka ah si uu u wajaho loolanka dunnida dhabta ah.
2. Waxbarte kasta wuxuu hormarin doonaa oo uu soo dhaweyn doonaa aqoonsigiisa, kartidiisa, danahiisa, iyo xirafaddihiisa isu-doodid si markaa uu si firfircoon u hago wadada waxbarashadooda.
3. Dhammaan ardayda oo dhan waxay diyaar u yihiin Dugsiga Barbaarinta Caruurta [Kindergarten].
4. Dhammaan ardayda dhigata fasalka seddexaad waa kuwa akhriska khabiir ku ah.
5. Dhammaan ardayda dhigata fasalka sideedaad waa kuwa xibaata khabiir ku ah.
6. Dhammaan ardayda oo dhan dugsiga sare way ka qallin-jebinnayaan.
7. Dhammaan ardayda oo dhan waxaa loo diyaarinnayaa kulliyad iyo shaqo.
8. Gondaloolooyinka guusha ee dhammaan ardayda oo dhan la wada xiraa.

Xeeladdaha

1. Jaaliyaddeena gudaha iyo dibaddaba waxaan ka qaybgelin doonaa si ay innooga caawiyaan in aan hantinno hadafkeena iyo natiijooyinka hadafkeenu.
2. Waxaan dejin doonaa oo aan wanaajin doonaa iskaashi jaaliyad oo gacan ka geysta si aan ku gaari la'hayn himiladeena oo dulucda qiimaynta ku barbardhiga.
3. Waxaan dejin doonaa oo aan hagaajin doonaa barnaamij iyo habdhaqan taas oo xaqiijinnaysa in ardaydeena oo dhan aan ka qaybgelinno si loo hantiyo natiijooyinka himiladeenu.
4. Waxaan dhisi doonaa dhabooyin 622 E-12 oo tartan geliya oo ardaydeena oo dhan u diyaariya dugsiyada sare ka dib.